

## **Ururka Laanqayrta Cas ee Finland**

### **Tilmaansiinta ku saabsan sida loo buuxiyo Foomka Raadinta Dadka**

#### **Guud ahaan:**

Fadlan foomka ku soo buuxbuuxiya af Finnish, ama af Iswiidhish ama af Ingiriis. Haddii aad foomka luuqad kale ku soo buuxbuuxisaan, fadlan turjubaanid soo raaciya.

Haddii Raadintu saamayso waddan laga isticimaalo alifbeeto aan ahayn tan laatiinka, fadlan dadka magacyadooda iyo meelaha magacyadooda ku soo qora labada nooc ee alifbeetada ahba, si aanu u dhicin khalad turjubaanidda ka yimaada.

Markaad raadinayso qoys, foomka waxaad ku buuxbuuxisaa qofka qoyska masuulka ka ah macluumaadkiisa, tusaale ahaan aabbe ama hooyo, dadka kale ee qoyska ah ee la socdana isla foomkaas ayaa lagu qorayaa. Haddii la og yahay inuu jiro qof qoyska ka mid ah oo aan qoyska la socon, qofkaas waxaa laga buuxbuuxinayaa foom gaar ah.

Raadinta Dadka ee Laanqayrta Cas waa lacag la'aan. Way adag tahay in hore loo sii qiyaaso wakhtiga raadintu qaadanayso iyo maxsuulka raadinta ka soo baxaa wuxuu noqon doono. Wax walba oo war ah oo raadinta la xiriira wrqad baannu dadka mar walba ugu soo sheegnaa. Haddii cinwaankaagu isbeddelo intay raadintu socoto, xasuuso inaad nala soo socod siisid.

### **Tilmaansiin ku saabsan sida foomka loo buuxbuuxinayo**

#### **1. QOFKA LA RAADINAYO MACLUUMAADKIISA**

##### **Magacyada koowaad iyo magaca qoyska**

Qofka la raadinayo magacyadiisa waa in loo qoraa si buuxda oo ugu suuragalsan.

##### **Magaca loo yaqaan (naanaystiisa)**

Haddii qofka guud ahaan bulshada looga yaqaan magac kale ama uu leeyahay naanays loo yaqaan, halka ku qor magaca ama naanaysta loo yaqaan.

##### **Lab ama dhedig**

Isku talaab ku qor khaanadda M=Nin ama N,F=Naag

##### **Magaca aabbaha**

Qofka la raadinayo magacyada aabbihiis oo dhan sida ugu buuxda ee suuragalka ah halkan ugu qor

##### **Magaca hooyada**

Qofka la raadinayo magacyada hooyadiis oo dhan sida ugu buuxda ee suuragalka ah halkan ugu qor

### **Waddanka uu dhalashadiisa leeyahay**

Halkan ku qor qofka la raadinayo waddanka uu dhalashadiisa leeyahay. Haddii waddankuu dhalashadiisa leeyahay aan la hubin ama ay waddamo dhowr ah jiraan, halkan ku qora oo waxaad ugu horaysiisaan waddanka aad sida u badinaysaan.

### **Asalka uu ka soo jeedo**

Haddii qofka la raadinayaa ka tirsan yahay koox asal ahaan uu ka soo jeedo, qabiil iyo qolo halkan baa lagu qori karaa.

### **Wakhtiga dhalashada**

Wakhtiga dhalashada oo buuxa waa in la sheegaa haddii ay suuragal tahay (maalin, bil iyo sannad). Haddii meesha qofka laga soo raadinayo laga isticimaalo nooc taariikh ah oo ka duwan taariikhda Finland laga isticimaalo, taariikhaha maalmaha iyo sannadaha waa in loo qoraa labada habba.

### **Meesha dhalashada**

Halkan ku qor qofka la raadinayo meesha uu ku dhashay, tuulada ama magaalada iyo waddanka.

### **Cinwaankii ugu dambeeyey ee lagu ogaa oo cad iyo taariikhda**

Halkan sida ugu cad ugu qor cinwaankii ugu dambeeyey ee lagu ogaa qofka la raadinayo. Cinwaanka wadada, xaafadda, magaalada / ama tuulada magaceeda, gobolka/ degmada ama qaybta waddanka ka midka ah ama waddanka. Waxaad kaloo soo sheegtaa wakhtiga uu qofka la raadinayaa deggenaan jirey cinwaankan la sheegayo. Haddii cinwaanku aanu si toos ah u caddayn, waxaad haddii loo baahdo sawiri kartaa khariidad ama tilmaan ahaan baad u sheegi kartaa, meel caan ah oo guud ahaan la yaqaan oo u dhow, sida masaajid ama suuq meesha u dhow.

### **Telefoon, fax, E-mail:**

Lambarka telefoonka waa in la soo qoraa isagoo wata furaha waddankaas lagu galo, tusaale ahaan sidan oo kale:  
+358 9 129 3344

## **2. DADKA QOFKA LA RAADINAYO LA SOCDA EE QOYSKA KA TIRSAN**

Dadka qoyska ka tirsan ee qofka la raadinayo la socda waxaad qoraysaa magacyadooda oo buuxa, wakhtiyada ay dhasheen, nin ama naag (wiil ama gabar) iyo qofka la raadinayo waxay isu yihiin.

Haddii dadka qoyska ka tirsan badan yihiin oo meesha loogu talagalay ee foomka ah ku filnaan weydo, waxaad isticimaashaa warqad kale oo gaar.

## **3. WARARKA RAADINTA DARTEED LOO BAAHAN YAHAY**

### **Goormaa kuugu dambeysey oo aad la xiriirtay qofkan la la' yahay, sidee ula xiriirtay**

Sheeg goortii kuugu dambeysey ee aad la xiriirtay qofkan la raadinayo, sidee baadna ula xiriirtay, ma waxaad kula xiriirtay warqad, telefoon?



### **Sababta keentay in xiriirku go'ay**

Waxaad sheegtay xaaladda keentay, inaad la xiriiri kari weydo qofkan la raadinayo. Waxaad kaloo sheegtaa sidaad isugu dayday inaad ula xiriirto qofkan la raadinayo iyo maxsuulka ka soo baxay isku deyitaanada aad isku dayday inaad la xiriirto.

### **Wixii faahfaahin dheeraad ah ee caawin kara raadinta**

Halkan ku qor dhammaan wixii war ah ee aad aaminsan tahay inay caawin karaan raadinta. Tusaale ahaan, meeshii ugu dambeysey ee qofka la raadinayaa ka shaqayn jirey iyo shaqada uu qaban jirey. Kaniisadda, qolka lagu tukado masaajidka uu tegi jirey. Qabiilka, qolada iyo asalka uu ka soo jeedo. Haddii uu askari ahaa, halkan ku qor derejadiisa iyo qaybtuu ka tirsanaa. Ardaydana waxaa halkan lagu qorayaa meeshay wax ka baran jireen iyo waxay baran jireen. Haddii aad wax war ah ka hayso qofka la raadinayo qorshiiisu wuxuu ahaa, intaan la waayin ka hor, iyana halkan ku qor.

### **Magacyada iyo cinwaanada dadka ay suuragalka tahay inay sheegaan warar dheeraad ah oo qofka la raadinayo ku saabsan**

Halkan ku qor magacyada dadka ay suuragalka tahay in laga helo qofka la raadinayo warkiisa. Tusaale ahaan, dadka qaraabada ah magacyadooda iyo meelaha lagala xiriiri karo ama magaca iyo meesha lagala xiriiri karo qofka qabiilka odayga u ah.

## **4. QOFKA WAX RAADINAYA MACLUUMAADKIISA.**

Halkan waxaad ku qortaa macluumaadkaaga oo buuxa iyo cinwaankaaga oo buuxa. Xasuuso inaad Laanqayrta Cas u soo sheegto wixii isbeddel ah ee ku yimaada cinwaankaaga, intay raadintu socoto.

### **Qofka la raadinayo waxaannu isu nahay:**

Qofka la raadinayo waxaad isu tihiin halkan ku qor.

### **Ogolaanshaha in macluumaadka dadka la isticimaali karo:**

Si Raadinta Dadka loo bilaabo, Ururka Laanqayrta Cas waa inuu helaa ogolaansho ah, in macluumaadka dadka la isticimaali karo oo la sii diri karo.

Waxaa jira waddamo badan oo marka dadka laga raadinayo la kaashado war isgaarsiinta (sida idaacadda, daabacaadaha internetka, wargeystyada). Halkan ku qor, haddii aad ogoshahay in la isticimaalo war isgaarsiinta, marka dadka la raadinayo.

### **Saxiix:**

Raadinta soo saxiix. Haddii qofka wax raadinayaa uu yahay qof aan qaangaar ahayn, wakiilkiisuna (edustaja) waa inuu raadinta soo saxiixaa.

### **Raadinta waxaa soo diray oo soo gudbiyey:**

Haddii aad qof ka caawisay buuxbuuxinta foomka Raadinta iyo soo diridiisa, macluumaadkaaga halkan ku soo qor, si aanu kuula soo xiriiri karno, ama halkan ku soo qora qofka aad rabtaan in Ururka Laanqayrta Cas la soo xiriiro arrintan darteed. Haddii aad tahay shaqaale sooshal ah ama aad qof aan qaangaar ahayn wakiil u tahay (edustaja), halkan ku soo qor meesha lagaala soo xiriiri karo.

#### **Finnish Red Cross Headquarters**

Tehtaankatu 1 a, P.O. Box 168, FIN-00141 Helsinki, Finland  
Tel. +358 20 701 2000

#### **Croix-Rouge Finlandaise Siège social**

Tehtaankatu 1 a, B.P. 168, FIN-00141 Helsinki, Finlande  
Tel. +358 20 701 2000



The Finnish Red Cross is a member of the international Federation of Red Cross and Red Crescent Societies.